



QEYBINTA IYO QOONDEYNTA TALLAALKA COVID-19 MA OGTAHAY?

YAA qaadan doona tallaalka?

Hay'adda dawooyinka Yurub waxay ogolaansho siisey suuq geynta saddex tallaalka: Pfizer, Moderna iyo Astra Zeneca. Marka tallaalada kale la oggolaado qaybintoodu way socon doontaa.

Dhammaan muwaadiniinta Malta iyo dhammaan dadka deggan Malta ee haysta kaarka degaanshaha oo sax ah ayaa xaq u leh tallaalka.

Malta, ayaa **liiska mudnaanta** waxaa ka mid noqon doona:

Kooxda Koowaad

- shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha xarunta daryeelka muddada-dheer (kuwa dadwaynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay)
- dadka ku nool xarumaha daryeelka muddada-dheer - waayeelka iyo caafimaadka maskaxda
- dadka jira 85 iyo wixii ka weyn.

Kooxda Labaad

- dhammaan kuwa safafka hore;
- dadka jira 80-85 sano.

Kooxda Saddexaad

- dadka qaba jirro dabadheeraad ah oo xaaladooda caafimaad ay iyaga gaar ahaan u galineyso halista ee cudur xalis kaalmeysa ama dhimasho;
- dadka jira da'da 70-80;
- shaqaalaha iskuulada iyo xarumaha xanaanada caruurta

Kooxda afraad

- dadka da'doodu ka weyn tahay 55 sano
- dadka intiisa kale

Waqtiga la bixinayo waxay ku xirnaan doontaa xawaaraha soo saarka tallaalka.

Sidee dadku u ogaan doonaan Goorta oo ay xaadiraan tallaalka?

Maamulka caafimaadka ayaa ku dhawaaqi doona sida tallaalka loo siin doono dadka ku nool xarumaha iyo bulshada dhexdeeda.

Tallaalka waxaa lagu bixin doonaa **si lacag la'aan ah waxaana laga heli karaa hay'adaha dowladda oo keliya.**

Tallaalka lagama heli doono suuqa gaarka loo leeyahay. Ka taxaddar shaqsiyaad kasta ama degellada iibiya tallaalka.

Talaalada lagu iibinayo khadka ama dadka aan loo igman waxay noqon karaan kuwo been abuur ah mana jirto qaab lagu ogaan karo haddii lagu ilaaliyay heerarka loo baahan yahay.

UNHCR Malta maaha isha rasmiga ah ee macluumaadkan. UNHCR Malta ayaa tarjuntay macluumaadkan, si ay kuugu suurto gasho inaad ku hesho luqad aad fahanto, isla markaana aad kula wadaagi karto qaxootiga iyo magangalyo-doonka ku sugan Malta.

Wixii dheeraad ah oo la turjumay macluumaadka ku saabsan Tallaalka COVID-19 fadlan booqo

<https://www.unhcr.org/mt/news/covid-19-information-for-malta>.

Xigasho: Agaasinka Horumarinta Caafimaadka iyo Kahortagga Cudurada, Malta